


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Daanyeel iyo Qarsoodigii Riyada



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Jonathan Hay

Waxa dhaqan-geliyay: Mary-Anne S.


Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaaso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Boqor Nebukadnesar baa riyooday, oo riyadan in
badan bay dhibtayn isaga. Awoodda Ilaah darteed,
Daanyeel baa karay inuu sheego fasirka riyada.




Wixii ugu horreeyey ee uu Daanyeel sameeyey waxay ahayd inuu u sharax ka bixiyo riyada sida ay ahayd. "Waxaad aragtay ekaan weyn, ekaanta xoogga weyn, Alla Boqorow. Ekaantu dhalaalkeeda aad buu u wanaagsanaa."




3

"Ekantaasuna madaxeeda waxa uu ahaa dahab wanaagsan," Wuu sii waday Daanyeel.




4

"Laabteeda iyo gacmaheeda waxay haayeen lacag."




5

"Caloosheeda iyo bowyaheeda waxay ahaayeen naxaas."



6

"Lugaheeda waxay ahaayeen bir, cagaheeda qaar wuxuu agaa bir, qaarna dhoobo."




7

Ka dib markii loo sharxay ekaantii boqorka, Daanyel wuxuu u sheegay intii ka hadhsanayd riyadii.




8

"Oo Ilaa waxaad aragtay dhagax aan gacmo lagu gooyn," Daanyeel baa sidaa u sheegay boqorka.



9

"Ekaantii kaga dhacay cagihii birta iyo dhoobada, wayna kala burbureen."




10

"Markaasaa wada burbureen oo noqdeen sdia buunshaha meelaha wax lagu tumo." Inyar buu aamusay Daanyeel. "Markaasaa dhagaxii ekaanta ku dhacay wuxuu noqday buur weyn oo dhulka oo idil buuxiyey."



11

Boqorkii wuu yaabay. Taasi waxay ahayd wixii uu ku riyooday! Sidee buu Daanyeel ku gartay taa? Keliya sabato ah Ilaah baa u sheegay Daanyeel. Ka dibna wuxuu u sheegay boqor Nebukadnesar waxa ay tahay fasiraadda riyada.



12


"Ilaaha samada ayaa ku siiyey adiga boqortooyadan, awooddan, xoogan iyo amaantan," Daanyeel ayaa sidaa u sheegay boqorka.



13

"Adigu waxaad tahay madaxa dahabka."

Daanyeel wuxuu u sheegay boqorka boqortooyadiisa dahabka ah inay idlaan doonto. Qaybta lacagta ee ekaantana la micne tahay daciifnimada boqortooyada meesheedii gali doonto.



Boqortooyada 1


Boqortooyada 2

Boqortooyada 3

Boqortooyada 4

14

Naxaastuna micnaheeda waxaa weeye boqortooyo kale. Birtuna iyo dhoobada waxay u taagan yihiin afar boqortooyo.



Boqortooyada 1

Boqortooyada 2

Boqortooyada 3

Boqortooyada 4


15

Wixii ugu dambeeyey uu Daanyeel u sheego boqorka sidan bay ahayd. "Ilaaha samada ayaa dhihi doonaa boqortooyo aan weligeed la baabi'inayn."




16

Boqorkii wuxuu ictiraafay in Ilaah keliya siin karo Daanyeel xigmadda iyo fahamka riyadiisa. Nebukadnesar wuxuu ugu abaal guday Daanyeel hodantanimoo oo isaga wuxuu ka dhigay ninka ugu muhiimsan boqortooyada.



17

Boqortooyinkii 1, 2, iyo tii 3 ba wey yimaadeen oo tageen.



Boqortooyada Ilaah baa iman doonto ka dib boqortooyada 4 aad. Masiix baa iman doonay oo u talinaya arlada. Oo dhakhsey u iman taasi!

18

Daanyeel iyo Qarsoodigii Riyada

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah, Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Daanyeel 2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiya." Sabuurka 119:130

19

Dhammaad

20

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysantahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad ugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16